



Faafin Degdeg ah

Cidda lala xariirayo: Cynthia Santana/Maareeyaha Isgaarsiinta 206-256-5219
cynthia.santana@seattle.gov

**Xafiiska Heerarka Shaqaalaha wuxuu Kudhawaaqayaa Qiimaha Ugu
hooseeya Mushaarka ee Seattle marka lagaaro 2020**

Seattle – (Oktoobar 14, 2019) – Xafiiska Heerarka Shaqaalaha ee magaalada Seattle (OLS, Office of Labor Standards) wuxuu ku dhawaaqayaa mushaarka ugu hooseeya ee Seattle oo dhaqan galaaya Janaayo 1, 2020. Kororka qiimaha waxaa amraaya Sharicaga Mushaharka Ugu hooseeya (Minimum Wage Ordinance). Mushaarka ugu yar wuxuu qabanaaya dhamaan shaqaalaha ka shaqeeya gudaha Seattle ayadoon laga eegeyn aqoonsiga soo galootino ee shaqaalaha.

- **Mushaarka ugu yar ee sanadka 2020 ee shirkadaha waawayn ee wax shaqalaysiiya** (501 ama kabaddan oo shaqaale ah) waa **\$16.39/saacadiiba.**
- **Mushaarka Ugu yar ee shirkadaha yaryar ee wax shaqalaaysiiya 2020** (500 ama kayar oo shaqaale ah) kuwaasoo aan bixin ugu yaraan \$2.25/saacadiiba oo lagu baxiyo gunooyinka caafimadka shaqaalaha iyo/ama kuwa aan shaqaaluhu kahelin ugu yaraan \$2.25/saacadiiba oo caawimaad ah waa **\$15.75/saacadiiba.**
- **Mushaarka Ugu yar ee shirkadaha yaryar ee wax shaqalaaysiiya 2020** kuwaasoo aan bixin ugu yaraan \$2.25/saacadiiba oo lagu baxiyo gunooyinka caafimadka shaqaalaha iyo/ama kuwa aan shaqaaluhu kahelo ugu yaraan \$2.25/saacadiiba oo caawimaad ah waa **\$13.50/saacadiiba.**

Bisha Diisambar 2019, OLS waxay boostada ugu soo diraysaa boorka goobta shaqada oo wax laga badalay ayna kujiraan macluumaadka heerarka shaqaalaha ee 2020 waxayna udiraysaa ganacsi kasta oo shatiga ganacsiga kahaysta Seattle. Koobiyada boorka goobta shaqada (oo Ingiriis kuqoran) waxaa laga soo degsan karaa [Webseetka OLS](#), xafiiska OLS oo kuyaala 810 3rd Avenue, Suite 375, iyo Xarun kasta [Oo Adeegyada Macaamiisha Magaalada Seattle](#). OLS ayaa turjumaysa boorka una badalaysa 19 luuqadood oo kale kuna dhawaaqaysa in laga heli karo oonleenka kunasoo daabacaysa koobiyadiisa wargayska wararka. Fadlan isqor si aad uhesho boorka [kujira Webseetka OLS](#).

- **Caawimaada shirkadaha:** si aad uhesho caawimaad bilaash ah oo gaar ah oo lagaa siiyo kudhaqanka xeerka mushaarka ugu hooseeya ee Seattle iyo sharciyada kale ee shaqaalaha, ama aad uqabsato balanka tababarka, wac 206-256-5297, iimeel udir business.laborstandards@seattle.gov ama [halkaan dhagsii](#) si aad ubuuxiso foomka codsiga oo oonleen ah.
- **Caawimaada shaqalaaha iyo dadwaynaha kale:** si aad noo waydiiso su'aal, usoo gudbiso cabasho, ama noo siiso macluumaad, wac 206-256-5297, iimeel udir workers.laborstandards@seattle.gov, booqo OLS oo kutaal Bartamaha Seattle 810 Third Avenue Suite 375, ama [halkaan dhagsii si aad ubuuxiso foomka oonleenka ah.](#)

####